

# Family Care

(Family Care)



Family Care waa **barnaamij daryeel muddo dheer** oo Medicaid ee loogu talloagalay dadka weyn iyo dadka weyn oo naafada ah.

**Daryeelka muddada dheer—adeeg ama taageero laga yaabo inaad uga baahatid ku caawinta shaqooyinka maalinlaha ah, sida labisashada ama qubeyska, sababtoo ah hal ama ka badan oo kuwa xiggo:**

- Waxaad qabtaa naafonimo.
- Waxaad jirtaa 65 sanno ama ka weyn.
- Waxaad qabtaa xaalad waarta oo dabada dheeraata.

## Yoolka Family Care

Yoolka Family Care ayaa ah inay kaa caawiyaan daboolida baahiyahaaga daryeelka muddada dheer iyo yoolalkaaga gaarka ah.

- Dooro taageerooyinkaaga iyo adeegyada.
- Go'aanso sida aad u isticmaashid maalinkaaga.
- Dareen ixtiraam iyo in si cadaalad ah laguula dhaqmay.
- Ku lug yeesho bulshadaada.
- Lahow asturnaan iyo dareen badqab.
- Xiriir la yeelo qoyska iyo saaxibada.
- Yeelo caafimaadka suurtoogalka ah ee ugu fiican.

## Sida Family Care u shaqeeyaan

Family Care wuxuu ku saabsanyahay inay kuu helaan taageerooyinka iyo adeegyada aad uga baahantahay nolol maalmeedka. Waa kuwaan waxaad filaneysid:

### Koox daryeel ee adiga ku taageero

Iyo Family Care, koox dad ah oo si wadajir ah kuula shaqeeyo. Kooxda daryeelkaaga waxaa ka mid ah:

- Adiga
- Maareeyaha daryeelka
- Kaaliso diiwaangashan
- Xubin qoyska ah ama qaraabo (*iqtiyaar*)
- Xirfadlayaasha kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah (*iqtiyaar*)

**Ogow:** Haddii qof uu ku sameeyo dooqyada sharciga matalaadaada, waxay kugula lug yeelanayaan adiga Family Care. Waxay hubinayaan in kooxdaada maqasho oo ixtiraamto codkaaga.



WISCONSIN DEPARTMENT  
of HEALTH SERVICES

P-00088DSO (05/2024)

## Adeegyada kuu ogolaanayo inaad guriga ku noolaato

Dhibaato malahan halka aad ku nooshahay, kooxda daryeelkaaga ayaa kaa caawin karo inaad heshid taageerada iyo adeegyada aad u baahantahay.

## Dooqa adeegyada iyo bixiyayaasha aad heshid.

Waxaad:

1. Kala hadleysaa kooxda daryeelkaaga waxa aad rabtid. Kooxda daryeelkaaga waxay sameynayaan qiimeynta ay kugu bartaan. Waxay fiirinayaan haddii aad jeceshahay halka aad ku nooshahay hadda. Waxay sidoo kale ogaanayaan taageerooyinka aad u baahantahay si aad ugu noolaatid nolosha aad rabtid.
2. La abuurayaan qorsho daryeel kooxda daryeelkaaga. Qorshooyinka daryeelkaaga ayaa kuu dhaqaajiyo yoolalka aad ku qeexday qiimeynta.
3. Ka dooro bixiyayaasha shabakad. Markii aad iska diiwaangelisid Family Care, waxaad ku biirtay MCO managed care organization (ururka daryeelka la maareeyay). Waxay kaala shaqeynaaan inaad heshid adeegyada daryeelka muddada dheer ee aad u baahantahay. Adeegyadaan waxaa ka mid noqon karo gaadiid, taageerada daryeelka guriga, cuntooyinka guriga la keeno, iyo wax badan. Waxaad ka dooraneynaa shabakada adeegyadaada iyo bixiyayaasha ama dhinaca dooqa adeega shaqsiga hago.
4. **Heleysaa adeegyada iyo taageerooyinka.** MCO-gaaga ayaa kaa caawinayo raadinta iyo qorsheynta adeegyada aad xulatay iyo MCO waxay ku ansixisaa gudaha xirmada faa'idada.

## Ku maalgelinta hal barnaamij

Family Care waxaa laga yaabaa inay u suurto gasho inay ku bixiso dhammaan adeegyada daryeelka muddada dheer hal barnaamij. Sababtoo ah adeegyadooda dhan waxay ka qeyb yihiin isla barnaamijka, way sahlantahay in la helo daryeel oo aad isticmaashid faa'idooyinkaaga.



## Meesha laga barto wax badan oo ku saabsan Family Care

Si aad wax badan uga baratid, fadlan booqo websaydka [Wisconsin Department of Health Services \(Waxda Adeegyada Caafimaadka Wisconsin DHS\)](https://dhs.wisconsin.gov/familycare/index.htm) (dhs.wisconsin.gov/familycare/index.htm) ama sawir koodhka QR.



Si aad u ogaatid haddii aad u qalantid xiriir:

- [ADRC ga deegaankaaga \(aging and disability resource center\) \(xarunta illaha gabowga iyo naafonimada\)](https://dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm).
- [Tribal ADRC kaaga \(aging and disability resource specialist\) \(taqasuska illaha gabowga iyo naafonimada\)](https://dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm).
- [DHSFCWebmail@dhs.wisconsin.gov](mailto:DHSFCWebmail@dhs.wisconsin.gov).
- Adeegyada Xubinta Medicaid ee 800-362-3002.